# Duruusta Tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa

**Qormadii 9aad**

**Qalinkii Cabdirisaaq Caqli.** ( e-mail: cabdicaqli@hotmail.com.).

Sidaynu qormadii hore ku soo aragnay waxay culimadii ama Awliyadii Harar deganayd u xilsaartay Sheikh Madar (AHN) inuu dagaaladii dalka Somaliland ka dhex aloosnaa qaboojiyo, isagoo horkacaya culimo badan oo magaalada Harar ka baranaysay cilmiyada diinta Islaamka. Waana mid jirta in qurbojoogtu markay ay ku laabtaan dalkooda hooyo ay ku soo kordhiyaan waayo-aragnimadii, iyo aqoontii ay soo korodhsadeen, mudadii ay dalalka shisheeye ku noolaayeen. Waana mid inoo muuqan karta in mudadii badnayd ee uu Sheikh Madar ku noolaa Harar, uu ka soo korodhsaday waayo-aragnimada dhulka la beerto ee la tabcado si dadku u soo saaraan cuntadooda lagama maarmaanka u ah ee dalkooda ka bixi karta. Sidoo kale, wuxuu ka soo korodhsaday waayo-aragnimada magaalooyinka dalka gudihiisa ku yaalla ee bulshooyin kala duwani si joogto ah u wada deganaan karaan, tiiyoo wada deganaanshahaasi abuuro is dhex galka dad aan hore u wada noolaan jirin. Waxaa intaasi u sii dheeraa aqoonta diineed ee uu soo korodhsaday mudadii badnayd ee uu diinta ka baranayey magaalada Harar. Waana mid aynu arki karno in aanay Sheikh Madar (AHN) ka dahsoonayn in uu dadkiisa uga faaiideeyo arrimahaasi uu soo korodhsaday.

Maxay hadaba ahaayeen tallaabooyinkii ugu horreeyay ee uu qaaday si arrimahaasi ugu hirgalaan? Waa mid aynu soo aragnay in muddo dheer uu Sheikh Madar (AHN) deganaa magaalada Harar, tiiyoo uu magaaladaasi ku guursaday, uguna dhasheen saddex wiil oo markaasi uu soo anababaxayay ahaa rag waaweyn oo dhallinyaro ah. Waana mid aynu dareemi karno sida ay qofkasta ugu adagtahay inuu ka soo guuro oo uu xididada u soo rujiyo meel uu muddo dheer deganaa oo caruurtiisu ku soo barbaartay kuna soo kortay, una raro bii'ad aanay weligood arag kuna dhex noolaan. Waxay arrintaasi inoo muujinaysaa in talaabadii ugu horreysay ee uu Sheikh Madar(AHN) qaaday ahayd sidii uu ugu qancin lahaa qoyskiisa guuritaanka uu ku talo jiro.

Waxaa kale oo la gudboonaa in uu u hawlgalo sidii socdaalkiisa ay ugu wehilin lahaayeen culimo badan oo Harar degan si ay uga taageeraan nabadeynta uu ku talo jiro inuu ka hirgeliyo Somaliland. Waa mid aynu arko sida culimo badan oo ka kala tirsan qabiilooyin kala duwani ugu sahli karaan nabadeynta uu ku talo jiro.

Waxaa muuqata in labadaasi tallaaboba u suurtogalayn. Taariikhda afka layskugu gudbiyaa waxay inoo soo tebisay in markii uu Sheikh Madar soo degay Hargeisa ay wehiliyeen culimo badan oo Harar diinta ka baranaysay. Culimadaasi oo iskugu jirtay kuwo ay Sheikh Madar(AHN) diinta wada baran jireen, iyo kuwo kale oo ahaa arday ka danbeysay. Culimadaasi la socotay ee ilaa iyo hadda ay noo suurtogashay inaan magacyadooda helno, waxaa ka mid ahaa: Sheikh Axmed Boon; Kabiir Cumar; Xaaji Cumar Xirsi; Sheikh Muxumed Cabdalle; Xaaji faarax; Sheikh Haaruun; Sheikh Xasan Guuled. Waxaa kale oo la socday 3 wiil oo uu dhalay oo rag waaweyn oo dhalinyaro aan guursan ah. Waxaana loo malaynayaa in saddexdaasi wiil hooyadood ay ku geeriyootay magaalada Harar ka hor intaanu u soo safrin Somaliland.

Innakoo garan karna saamaynta ay ku yeelan karto Sheikh Madar (AHN) magaalada Harar iyo agagaarkeeda beeralayda ahi, waxaa suurtogal ah in uu ku talo jiray in uu dego goob beero la tabcadaa ka suurtogeli karaan, si joogto ahna loo degi karo, noqotana aasaaskii jameecada dariiqada qaadiriyada ee uu madaxda ka yahay. Waxaynu ogsoonahay in goobtaasi ay noqotay Hargeysa. Haddii aynu hadaba isweydiinno sababta ku kelliftay goobtani iyo habka uu ku doortay in goobta uu degayaa noqoto Hargeysa, waxaa inoo muuqan kara in Sheikh Madar (AHN) Ilaahay u talo saartay inuu u dooro goobta uu degayo.

Innakoo sharraxaada arrinkaasi kor ku xusan daba soconna, waxay taariikhda afka layskugu gudbiyaa inoo soo tebisay in Sheikh Madar iyo culimadii la socotay ay ka soo kicitimeen magaalada Harar iyagoo fardo fuushan. Markii ay soo gaadheen halka uu ka soo unkamo ee laagaha kala duwani iskugu soo ururaan, ayuu Sheikh Madar joojiyay culimadii iyo xertii la socotay oo uu yidhi “Waysadayda biyuhu ka buuxaan ayaan ka daloolinayaa dalool yar oo dhibic biyo ahi ka soo dhici karto. Halka ay biyaha weysadaasi ku dhamaadaan ayeynu degaynaa.” Hadalkaasi haddii aynu garab dhigno habka ay culimada diinta Islaamku ku dhaqanto marka ay arrimo tan la mid ah oo kale soo foodsaaraan, waxaa inoo muuqan kara weji kale oo aan taasi ka fogeyn. Waa mid la ogsoonyahay in Islaamku inoo sheegay in la istikhaaraysto marka uu kula soo gudboonaado arrin go’aanqaadashadiisa shaki kaa galo. Sidoo kale waa mid istikhaaradu aad ugu badan culimada diinta ku xeeldheer gaar ahaan dadka tasawufka ku dhaqma. Waana mid suurto gal ah in uu Sheikh Madar Ilaahay u talo saartay oo uu istikhaaraystay si Ilaahay ugu dooro goobta ku haboon inuu dego, taasoo uu ku garan doono inay tahay halka biyaha weysaadaasi uu dalooliyay ku dhamaadaan. Waxaa kale oo laynoo soo tebiyay in markii ay marayeen Hargeysa in weysadii oo biyo badani ku jiraan uu furkii ka dhacay, biyihii oo idilina daateen. Markii uu Sheikh Madar arkay biyihii oo weysadii ka wada daatay ayuu yidhi “Alle ayaa qadaray in halkani noqoto goobtii aynu degaynay.” Kaasi wuxuu ahaa mid ka mid ah wararka taariikhda afka laynoogu soo gudbiyay. Waana mid aan ka soo xigtay dadkii ugu dhowaa ee tafiirtiisa ahaa.

Haddii aynu dhinac kale arrinkan ka eegno, waxaa inoo muuqanaya inay xikmad Ilaahay ku jirtay doorashada goobtani marka aynu fiirinno duruufihii xilliyadaasi jiray iyo waxay rumaysnaayeen dadkii goobtan agagaarkeeda deganaa. Goobaha dadku ugu badanyihiin laguna kulmo, waxay ahaan jireen ceelalka laga cabbo iyo dekado ku yaalla agagarka xeebta badda. Waana mid loo arki karo in goobahaasi ahaayeen meelihii ugu haboonaa ee ay ahayd in uu Sheikh Madar (AHN) dego si uu uga hirgeliyo hawlihii uu ku talo jiray. Haddii se aynu si qotodheer u fiirino, waxaa inoo muuqanaya in goobahaasi lahaayeen sifaale nabadaynta uu Sheikh Madar (AHN) u socday liddi ku ah. Ceel walba oo dalka ku yaalay, iyo goobtaasi uu ka dhex qodan yahay, waxaa sheegan jiray qabiil go’an oo rumaysnaa in dadka qabiilkaasi oo keliyi xaq u leeyihiin inay ka cabaan. Haddii uu Sheikh Madar (AHN) degi lahaa goob ceel ka qodan yahay, waxaa inoo muuqan kara inay gaar u ahaan lahayd qabiil gooniya oo dadka ku abtirsada oo keliyii ka sheegan lahaayeen goobtaasi dadka kale oo idil. Taasoo ay adkaan lahayd in la wada beerto, la wada dego, ama laga sameeyo Jameeco reero kala duwani ku walaaloobaan.

Sidoo kale, waxaa dekadihii xilliyadaasi ka samaysnaa xeebaha, sheegan jiray reero iyo qabiilooyin go'an. Haddii aynu dib u eegno heshiisyadii Saamaha ee lala saxeexday Ingiriiska Xilli dhawr iyo toban sano ka danbeeyay degitaankii Sheikh Madar ee Hargeisa, waxaa inoo muuqanay in 12 dekadood oo heshiisyadaasi ku xusan uu mid walba qabiil go'an oo keliyi taladeeda lahaa. Dekadahaasi oo haddii aan dhinaca galbeedka ka bilaabo kala ahaa: Saylac, Buloxaar, Berbera, Ceeldaraad, Karin, Conqor; Rukuuda, Xiis, Maydh, Shalcaw, Raas Khadiib iyo Bender Qoray. Marka laga reebo Saylac oo laba qabiil oo kala duwani mid waliba goonidii u saxeexay heshiiskaasi xilli gooniya, dhamaan dekadaha kale oo idil waxaa saxeexay qabiil gaar ah. Taasoo aynu arki karno sida reerkaasi oo keliyi uga sheegan lahaa reeraha uu Sheikh Madar (AHN) doonyo inuu walaaleeyo oo uu ka dhigo jameeco keliya, haddii uu mid ka mid ah dekadahaasi degi lahaa.

Haddi aynu dib u yara jaleecno sida ay Hargeysi xilligaasi ahayd, waxaa inoo muuqanaya inay ahayd duur jiq ah oo ay qarisay dhir cufan oo kala duwan, iskuguna jirta kuwo dhaadheer iyo kuwo gaagaaban. Waxay ahayd goob aan cidi dhex degin xoolahana aan la daaqsiin oo reeruhu markay guurayaan si degdeg ah oo feejigan u dhaafaan ama hareeraha ka maraan iyagoo ka cabsi qaba saddex cadow oo Ilaahay goobtan ku mannaystay. Waxay goobtu hooy iyo baro gaadmo u ahayd libaaxyo raxan raxan ah oo aan dad iyo xoolo tooni ka nabadgelayn. Dhulka hoose waxaa mulacyeynayey masas noocyo badan, oo badidoodu waabay sun ah ka buuxaan, qofka ay micida la helaanna aanu nolol dhulka ula dhacayn. Waxaa intaasi u dheeraa kaneeco gabood ka dhigata dhirta cufan ee goobtani ku caanka tahay, dadkuna aad uga baqaan duumada ay qaniinyadeedu keeni karto.

Duurjoogta iyo ugaadh noocyo badan ayaa dhex mushaaxi jirtay goobtani, tiiyoo aad moodid in qala yarida, dad iyo xoolaba, ee goobtan looga caagay saddexdii cadow ee aynu kor ku soo sheegnay, ay sababtay in ay noqoto xarun ay isku soo urursadaan ugaadh oo idili. Sidoo kale wuxuu dooxa Hargeysa noqday wadiiqo uu maroodigu ugu kala gudbo goobaha uu xilliyada kala duwan isku bedelo. Dooxuna ma lahayn ceelal la qoday oo biyo laga gaadhay si xoolaha iyo dadkuba uga cabaan.

Marka aynu sawirkaasi aragno waxay inoogu muuqan kartaa in goobtani ahayd meel aan ku haboonayn degitaan. Haddii se aynu sawir kale yara fiirinno waxaa inoo muuqan kara weji kale: Waxay beelaha ay goobtani kulmisaa u qaybsami jireen laba nooc oo xilli guurkooda iyo ag degista goobtani kala gedisantahay. Qaybta hore, oo loo yaqaanay reer oogo ceelashooduna ku yaaleen oogada, waxay badanaa xilliga guga ee roobku da'o u guuri jireen dhinaca hawdka iyagoo u raadsan jiray naqa iyo biyaha roobabka guga. Marka ay baadka iyo biyuhu ku yaraadaan hawdkana waxay dib ugu soo hayaami jireen dhinaca oogada iyagoo u soo ceel fadhiisan jiray ceelashooda oogada ka qodan. Qaybta labaad oo loo yaqaannay reer guban, ceelashooduna ku yaaleen gubanka waxay goobtani soo ag degi jireen xilliga guga oo gubanku aad u kulul yahay. Mararka qaarkoodna, hadii naq yaraani jirto, waxay u sii dhaafi jireen dhinaca hawd. Xilliga jiilaalkana waxay dib ugu soo laaban jireen gubanka oo kulaylkii ka yaraaday, baadkiina sii baxay.

Labada ceel ee laga cabbo ee goobtan Hargeysa ugu dhowi waxay ahaayeen Ceelka Xaraf iyo Ceelka Dhogor ( Aw Barkhadle). Ceelalka goobahaasi ka qodanna waxaa sheegan jiray qabiilooyin iyo reero gaar ah oo xoolahooda laga waraabiyo. Haddii cid kale oo reerahaasi ceelasha sheeganaya aan ahayn u baahdaan inay ka cabaan ceelkaasi, waxaa lagama maarmaan ahaa in fasax laga helo oo uu ogolaado reerka ceelkaasi sheegtaa.

Wuxuu sawirkaasi kale inoo muujinayaa in goobtan Hargeysi kulminaysay qabiilooyin iyo reero kale duwan. Marka hore qaar lagu kala tilmaamo reer oogo iyo reer guban ayay kulmisaa. Mar labaadna qabiilooyin kala duwan oo ka kala degi jiray bari iyo galbeed ayay dhex u ahayd. Waxay ahayd goob aan reer keliyi sheegan karin, kulmin kartana reero kala duwan. Taasoo haddii uu Sheikh Madar (AHN) ka dhigo xarunta Jameecada dariiqadiisa goobtaasi, ay noqon doonto meel walaalayn karta dad aan hore isku dhex geli jirin oo lagana yaabo in colaado xumi soo dhex mareen. Waxay taasi inoo muujinaysaa in xikmad rabaaniyi ku jirtay doorashada goobtani.